# CAADEYSI NOLOLEED WANAAGSA EE CARUURTA IYO DHALINYARADA

## Wadada ama jidka waxbarashada iyo horumarka

# SHAQADA KALKAALIYAALKA CAAFIMAAD EE ISKOOLLADA WAA

## – ka hor tagga caqabadaha waxbarasha iyo horumarka

Maxaa ka mid ah booqashada caafimaadka ee iskoolka? Maxaynu u miisanaa una cabbirnaa carruurta? Waa maxay macnaha qaab-nololeedku u leeyahay caafimaadka iyo ku aflaaxida waxbarashada ee iskoolka?

**KALKAALIYADA CAAFIMAADKA** ee iskoolka Waxay qeyb ka tahay tiimka ama kooxda qabilsan caafimaadka ardayda ee dhigata iskoolka. Iyada oo weheshaneysa dhakhtarka iskoolka waxey wax kubiirin kusameeyaan caafimaadka ardeyda EMI. Waxaa kalo ka mid ah kooxdaan kurator, qof cilmi-nafsi yiqaan ah (sikologa), iyo macalimiinta qaarka ah. Maamulaha iskuulka waa u ka mid yahay kooxda caafimaadka ardayda (EMI) oo wuxu hogaamiyaa shaqada kooxda.

Shaqada kalkaalisada iskoolku waxa salidig u ah Heshiiska Xuquuqda Carruurta.

Shaqada kooxdan qabilsan caafimaadka ardeyda waxaa haga Xeerka ama sharciga  iskoolka. Qoraalkaan waxaa loogu talagalay in lagu bixiyo macluumaad ku saabsan shaqada kalkaalisada iskoolka sida booqashooyinka caafimaad iyo wadahadalada caafimaad oo la siiyo dhammaan ardayda.

Waxaa qayb muhiim ka ah shaqada EMI (Elevhälsans medicinska insats) waa la shaqaynta kooxda caafimaadka ardayda iyo ka qayb qaadashada horumarinta iyo ka hortagga heer shaqsi, heer kooxeed iyo urur ahaneedba. Shaqada kooxdan caafimaadka ardayda halkan laguma sifaynaaya si faahfaahsan, laakin waxa lagu tilmaamay waa qaybaha gaarka ah ee quseeya kalkaalisada iskoolka.

Kooxda qabilsan caafidmaadka ardeyda (Elevhälsans medicinska insats) waxay bixiyaan booqashooyin caafimaad oo ka kooban baaritaano kala duwan oo loogu talagalay dhammaan ardayda.

Booqashooyinka caafimaadka waxa sidoo kale ka mid ah wadahadalo iyo wareysi caafimaad ee lalayeesho ardeyda halkaas oo ardayda la siiyo fursad ay uga hadli karaan arrimaha la xiriira hab-nololeedkooda iyo xaaladdooda iskoolka. Nuxurka booqashooyinku cafimaadka wey kala duwanyihin waxayna ku xiran tahay heerka waxbarasho ama fasalka ee arddayga. Ujeedada booqashada caafimaadka waa in la xoojiyo caafimaadka ardayda taasina waxay horseedi kartaa in goor hore la aqoonsado ardayda u baahan la qabsi gaar ah iyo taageero dheeri ah si loo gaaro yoolalka waxbarasho.

Marka laga soo tago waxa uu qabo sharciga waxbarashada, kalkaalisada iskoolka shaqadeeda waxaa ka mid ah in ay bixiso tallaalo waafaqsan barnaamijka tallaalka ee Iswiidhen oo ay mas'uul ka tahay Hey'adda caafimaadka dadweynaha. Carruurta / ardayda aan horey loo tallaalin oo raacin barnaamijka tallaalka carruurnimada waxaa la siiyaa tallaalo dheeri ah ilaa da'da 18 jirka. Haddii aad hore u diidday tallaalka ilmahaaga balse aad ka shallaysay ama aad su'aalo qabtid, waxa lagugu soo dhawaynayaa inaad la xidhiidho kalkaalisada iskoolka.

Kalkaalisada iskoolka umahogaansano sharciga waxbarashada oo keliya balse xataa sida uu dhigayo sharciga daryeelka caafimaadka kaas oo sifiican uqeexaayo shaqada kalkaalisada oo ah ka hortagga caafimaad darrida kutimaado ardeyda. Sharciga bukaan-socodka ayaa tilmaamaya in bukaan-socodka, oo markaan loo la jeedo ardayda ama cidda ka mus´uulka ah, inay xaq u leeyihiin inay helaan macluumaadka hababka looga hortago jirro ama dhaawac.



Shaqadan kahortaga ah ayaa lafuliyaa xiliyada booqashooyinka caafimaad iyo sido kale iyada oo labixinaayo macluumaadka caafidmaadka xiliyada booqashooyinka shaqsiga ah, baaritaanada caafimaadka heer kooxeed iyo kulamada waalidka.

## Booqashada caafimaadka

Booqashada caafimaad waxay ujeedadeedu tahay in kor loo qaado caafimaadka wanaagsan iyo doorashada qaab nolo`leedka wanaagsan, in la dhiirigaliyo ardayda in ay sii wadan oo xoojiyaan qaab nololeedka wanaagsan iyo in hore loo ogaado dhibaatooyinka ama calaamadaha caafimaad darro ee ardeyda, taasoo macnaheedu noqon karto in ardeygu uu u baahan yahay taageero gaar ah ama dadaallo kale.

Kalkaalisada caafimaad ee iskoollaadka waxay meesha ay ka sii wadaan boqoshooyinka caafimaad halkii ugu dambeysay oo ay ku joojiyeen BVC:ga iyo shaqooyin kale oo kamid ah Barnaamijka Aasaasiga ah ee caafimaad. Baaritaanno caafimaad oo kala duwan ayaa loo sameeya ardeyda maadama ay dhigtaan fasalla kala duwan iyo da'a kala ah ay yihiin. Baaritaanka caafimaadka ee ardayda waa ay kukala duwanaan karaan degmooyinka, skoollada degmada iyo iskoollada madax banaan.


Booqoshada caafimaadka waxaa ka mid ah in la baaro korritaanka ilmaha, arragtidooda, maqalkooda, dhabarka iyo in lala yeesho wareysi la xiriira caafimaadkooda.

## Wadahadalka caafimaadka

Dhamaan ardayda oo idil waxaa loogu yeera wareysi cafimaad ugu horeyn marka ay dhiganaayan xanaanada caruurta (ayagoo oo u la socda waalidkooda), fasalka 4: aad, fasalka 7: aad ama 8: aad iyo sanadka ugu horeeya ee dugsi sare. Kahor wareysiga caafimaadka, ardayda inta badan waa in ay ka jawaabaan su'aalo meelo kala duwan oo caafimaadkooda taabanaya. Su'aalaha waxay noqon karaan kuwa kusaabsan beyadda iskoollka, amniga iskoollka, wakhtiga firaaqada, caadooyinka cuntada, dhaqdhaqaaqa iyo hurdada. Su'aalaha ku saabsan dhibaatooyinka caafimaad sida walbahaarka (Istreeska), madax-xanuunka, xanuun iwm ayaa sidoo kale kamid ah. Ardayda yara da´da weyn waxaa la weydiiyaa su ´aalo ku saabsan arimaha tobaakada, qamriga, daroogada, galmada iyo rabshada.

Wareysga cafimaad waxaa loo qabtaa qaab ah in u udhaca si ardayga laftiisa uu koontarooli kara wadahadalka oo uu awood u leeyahay in uu soo qaado waxyaabaha muhiimka u ah.

Dabeecadaha khatarta ah waa la dareemi karaa oo kalkaalisada iskoollka waxay dhiirigelin kartaa inay ardeydu horumariyaan caadooyinka wanaagsan. Haddii ardaygu ama masuulka ay rabaan, Kalkaalisada iskoollka waxay ufidin kartaa taageero iyo talooyin, haddii loo baahdana tixraac dheeraad ah si aad u hesho gargaar dheeraad ah. Dhammaan su'aalaha ee sahanka ku jira waa waxyaabo



muhiimada ay uleeyihiin cafimaadka iyo in ay caafimaadka kor loogu qaadikaro mustaqbalka dhow iyo kan fogba lagu mujiyey daraasadyo iyo cilmi-baris la sameeyey.

## Kobaca

Dhererka iyo miisaanka ardayda waxa la eegaa ama la kontroola labadii ilaa saddexdii sannadoodba mar. Dhererka iyo miisaanka ayaa lagu dhibciyaa qalooca kobaca ardayda iyo tusmada cufka jirka (BMI) ayaa la xisaabiyaa. Caruurta badankoodu waxay kanaalkooda ka helaan qalooca kobaca markay laba sano jiraan ka dibna raacaan. Is barbar dhiga caruurta kala duwan waa in aynu dhicin. Waxa muhiimka ahi waa in la arko sida u ilmuhu u korayo. Waqtigiisa iyo haddii dhererka iyo miisaanka u raacayo.

Kalkaalisada caafimaadka iskoollka waxaa caado u ah oo ay awood u leedahay tarjumida qalooca korrinka iyo in ay kafahanto waxbadan. Ilmahu marka ay korayaan waa in culeysku uu nusqamin, dherirkana waa in u kordhaa si caadi markii loo eego waqtiga uu ilmuhu qangaaraya. Calaamadaha baaluqnimada hore usoodgadaga ama dibdhaca ayaa la arkaya. Cuduro kala duwan oo saameyn kara korriinka fiiro gaar ah aya loo yeelanaya xiliyada baritaanka cafimaadka.

Marka kalkaalisada dugsigu cabirto oo miisaamayso ardayga, waxay eegtaa ardayga guud ahaan, si ay awood ugu yeelato, tusaale ahaan, inay u soo jeediso in ardaygu leeyahay leexasho xagga qaababka dhaqdhaqaaqa, uu si aan caadi ahayn u cirrooday ama uu ku dhacay xanuuno maqaar kale ah. Su'aalaha waxaa badanaa la weydiiyaa sida ardaygu dareemayo isla waqtigaas.

Marka ay kalkaalisada iskoollka cabireyso, miisaamayso ardayga, waxay eegtaa ardayga guud ahaan, si ay awood ugu yeelato, tusaale ahaan, inay u soo jeediso hadii ardaygu leeyahay leexleexasho xagga qaababka dhaqdhaqaaqa ah, hadii u si aan caadi ahayn u cirroobay ama u ku dhacay xanuuno maqaarka oo kale. Sidoo kale waxaa inta badan ardeyda la weydiyaa su'aalo kusaabsan sida u dareenkooda yahay isla waqtigaas.

**SHAQADA KAHORTAGGA AMA** (tallaabooyin) Macneheedu waa ka hortagga soo ifbaxa ama saamaynta sababa cudurada, dhaawacyada, dhibaatooyinka jirka, maskaxda ama dhibaatooyinka bulsheed, tusaale ahaan taas oo ah, tallaabooyin lagu dhimayo khatarta caafimaad darro. Waxay ku saabsan tahay dhimista khatarta dhibaato dhalata ama dib u soo bixida dhibaato. Aqoonta arrimaha la xidhiidha khatarta sii kordheysa iyo calaamadaha digniinta hore (sida dabeecadaha khatarta ah ama calaamadaha hore) waa inta badan meesha laga bilaabo tallaabooyinka ka hortagga.

**SHAQADA HORUMARINTA CAAFIMAADKA** (ama tallaabooyin) Macnaheedu waa in la xoojiya ama la sii adkeeya wanaagsanaanta jirka, maskaxda iyo fayoobida bulshadeed ee beniaadamka. Taasi waxay ku saabsan tahay dhiirigelinta iyo xoojinta waxyaalaha ina dareensiiya wanaaga. Dadaallada dhiirrigelinta waxay sidoo kale kordhin karaan adkeysiga haddii ay dhacdo dhibaatooyin iyo caqabado.

## Aragga



Ardayda oo dhan waxaa loogu yeera baaritaannada aragga. Baaritaanka waxaa la sameeya xiliyada lagu gudujiro booqashada cafimaadka ee xanaanada caruurta hase yeeshee waqti damba wa la sameyaa baaritaankaan hadii loo baahdo. Ujeedadu baaritaankan waa in hore loogu ogaado ardeyga aragga hose leh ama waxa loo yiqaano amblyopi. Intaa wixii ka sii baxsan waxa loo yiqaano barnaamijka asaasiga ah kalkaalisada cafimaadka ee iskoollka waa ay awood u leedahay hubinta aragga ardayga hadii loo baahdo xiliga baaritanada akhriska iyo qoraalka,dhibaatooyinka fiirsashada iyo ardeyda dhawaan timidey wadanka.

Baaritaanka araga waxa lagu baaraa sabuuradda arragtida lehna xarfo iyo tiro iyo maro marba il lagu dado si isha kale aragtideeda loo ogaado. Waxaa kale oo jira sabuuradda tilmaamta oo looguna talo galay caruurta yar yar oo weli baranin qoraalka iyo aqrinta. Aragga isha waa muhiim haddii ay noqoto waxbarashada sida aqrinta markaa waa muhiim in la baaro araggtida caruurta inta ay bilaabin fasalka 1: aad. Haddii ardeygu kuguuleysan waayo natiijada lafilaayo baaritaanka wax aragga dhowr toddobaad kadib ayaa lagu celinaaya. Haddii tuhun jira in aragga ilmaha uu liito waxaa loo diraya dhakhtarka indhaa haddii ilmahu ay ka yar yihiin 8 sano, hadii uu ka weyn yahay 8 sano jir waxaa loo diraya dhakhtarka bixiya okiyaalaha.

## Maqal

Caruurta dhamaan waxaa logu yeera baaritaanka maqalka marka ya xanaanada caruurta dhiganaayan. Mararaka qaarkood waxaa maqalka laga baaraa marka ay kujiraan fasalka 1: aad. Si loo ogaado haddii maqalka ilmahu uu liito iyo in kale oo u sameeyn kara fahamka hadalka. Baaritaanka maqalka waxa la sameyn karaa waqti dambe haddii caruurta ay u baahan yihiin. Hase yeeshee ardayda dhawaan dalka timidey waa labaaraya maqalkooda ee da´kuma xerno.

Maqal la'aantu waxay macnaheedu noqon kartaa marka dhawaaq ama codka si daciif ah loo maqlaa, qallocanyahay ama gebi ahanba la maqlin. Naafada maqalka waxaa inta badan keena dhawaqa qaska ah ee deegaanka waxayna ka dhigi kartaa mid aad u adag in la garto ama lafahmo hadalka. Deegaanka iskoolka waa mid kaga baahan ardayga wax badan xagga maqalka, sidaa darteed, waxaa muhiim ah in fiiro gaar ah loo yeesho lumista maqalka inta ay gori gor tahay. Haddii ardayga maqalkiisa u liito markaa waa ay ku adkaaneysa waxbarashada. Ardayga maqalkiisa liita waa ay ku adag tahay inuu si fiican qoralka ubarto maadaama si fiican u umaqlin dhawaaqa laga rabo in u qoro.

## Xakamaynta dhabarka

Ardayda waxaa logu yeera baaritaanka dhabarka inta iskoollka u socdo xiliyada  booqoshada caafimaad, inta badan marka ardeygu u dhiganaya fasalka 4:aad iyo fasalka 7:aad ama fasalka 8:aad.

Ujeedadu waa in goor hore la ogaado ardayga qaba cudurka qalooca (scoliosis) oo laga yaba in loo baahdo in la daba galo oo mararka qaarkood la daweeyo. Waxa loo yaqaan scoliosis idiopathic waa sababta ugu badan ee qalooca ku keenta qalfoofka dhabarka. Cudurkan waa mid caadi ah, waxaana laguyiqaana dhabarka oo qaloocda. Dhabar qalooca waa wax inta badan dhaca oo badi uma baahno daaweyn. Hase yeshee ardayga lagu arko dhabar qalooc waxaa lagu casuuma baaritaana kala duduwan inta u korrayaa.

*Wixi faahfahin ka aqriso warqaddaha kulifaaqan oo ka hadlaaya cunnada haboon, dhaq dhaqaaqa jirka, hurdada iyo dheelitirka nolosha iyo cayilka.*

**Kalkaalisada iskuulka waxay doonaysaa inay ilaaliso carruurta inay dareemaan caafimaad sida ugu macquulsan jir ahaan iyo maskax ahaanba. Aqoonta la xiriirka waxaa na dareensiyo wanaaga iyo caafimaadka  waxay ka timaada natiijo cilmi baaris ah.**

---

**Tixraacyo**

*Guddiga caafimaadka iyo daryeelka qaranka iyo Hay'adda Qaranka ee Waxbarashada (2016) Jiheynta caafimaadka ardayda.*

**Xeer**

Skollagen (2010:800) utbildningsdepartementet
Sharciga skuulaadka (2010:800) wasaaradda waxbarashada
Hälso-och sjukvårdslag (2017:30) Guddiga Qaranka ee caafimaadka iyo daryeeka
Sharciga badbaadada Bukaanka (2010:800) Guddiga Qaranka e caafimaadka iyo daryeeka
Patientsäkerhetslag (2010:659) Social departementet
Sharciga badbaadada bukaanka (2010:659) Wasaaradda arrimaha bulshada
Offentlighet och sekretesslag (2009:400) Justitiedepartementet
Sharciga faafinta iyo sirta (2009:400) Wasaaradda cadaaladda

Kalkaaliyaalka caafimaadka iskuulka ee dedmooyinka waa ku waajib ilaalinta sirta ayadoo la raacaya Sharciga faafinta iyo sirta. Laakiin wixii quseeya Iskuladka xorta ah waa in ay racaan sir qarinta ayadoo loo maraya sharciga Sharciga badbaadada bukaanka.

Qoraalkaan waxaa soo diyaar gareeyey ururadda kal ah ururka kal kaaliyeyaalka iswidhen (Svensk sjuksköterskeförening) iyo urur qarameedka kalkaliyaalka oo hadafkoodu yahay in ay caawiyaan kal kaalkiye caafimaadyadda iskuulaadka iyo gudbinta himilooyinga caafimaadka booqasho caafimaadeedka ee ardayda iyo waalidiinta. qoraalkaan waxaa kaloo la socda warqado warbixineed oo ku saabsan cunno wanaagsa, hurdo, dhaq dhaqaaq jireed, dheelitirka nolosha, iyo culeyska dheeriga ah iyo baruurta ilmaha.

Maadadaan waxaa loo diyaariyey qeyb-mashruuceed ka hadlayey shaqo ku saabsan horumarinta cafimaadka iyo dadaalka hore oo loogu jira xasaasi galinta saldhigga caada nololeedka oo ay maalgaliso hayadda guddiga qaranka ee caafimaadka iyo daryeelka galisana dadaal ku saabsan horumarinta, ka hortagga iyo daaweynta nololcaadeedka caafimaad xumida keena.

**Ururka kal kaaliyaalka ee iswidhen**
Baldersgatan 1
114 27 Stockholm
Tel 08-412 24 00
www.swenurse.se/levnadsvanor

**Uru qarameedka kal**
**kaaliyeyaasha iskuulaadka**
www.skolskoterskor.se

---

**Xaqiiqada wax soo saarkan**
**Soo saare:** Ururka kal kaaliyaalka ee iswidhen 2020
**Foomka naxraha:** Losita Design AB, www.lositadesign.se
**Sawir:** Colourbox **ISBN:** 978-91-85060-61-0